

فقه بناء الدول

Fiqiga dhisidda dowladaha

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالثَّقْوَى وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدُوانِ)

(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambi iyo colnimo)

Waxaan qirayaan in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaan in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Waxaan shaki ku jirin in dhammaan ummadaha iyo shucuubta ay u ordayaan inay dhistaan dowlad xoog leh oo sugar, iyadoo haysata wax kaste oo awood iyo barwaaqo sidey u xaqiijiyaan danahooda, dhismaha dowladaha wuxuu u baahan yahay khibro iyo aqoon iyo in lala socdo xaaladda iyo waxyaalaha ka hor imaanaya, farqi weyn ayaa u dhixceeyaa fiqiga dadka iyo kooxaha iyo fiqiga dhisidda dowladaha iyo rabitaankooda ee caalamka si dhaqsi isku baddalaya oo aan garanayn

wax aan ahyan gaashaanbuur siyaasadeed iyo mid dhaqaaleed iyo mid dhaqameedba, waxaa hagaya qawaaniin iyo heshiisyo caalami ah iskabada dhaafee qof caaqli ah xataa dowlad ayna ka leexan karin ama aysan iska indhatiri karin wixii waaqaca keenaya.

Dowladda waa ilaalo dowladda waa amaan dowladda waa kalsooni dowladda waa deganaan dowladda waa nidaam dowladda waa mu'asasooyin, dowladda waa dhisme fikri iyo siyaasad iyo dhaqaale iyo nidaam iyo sharci, dowlad la'aan waa fowdo.

Waxyaalaha ugu muhimsan oo keenaya dhismaha dowladaha: waa adkeynta mu'asasooyinka dowladda waddaniga, iyo in kor loo qaado dowladda sharciga ku dhisan, dowladda dastuurka dowladda cadaaladda, taas waxay keenaysaa dadka inay tixgaliyaan qawaaniinta dowladda iyo nidaamkeeda, inay raacaan qaacidooyinka waddada, inaysan qaab cagsi ah ugu soconin waddada ama si degdeg iwm. oo lagu tiriyo xadgudubka lagu xadgudbayo waddada xaqeeda iyo xuquuqda dadka, taasoo keeni karta inuu naftiisa gooyo ama uu nafaf kale gooyo ama uu dhaawac u geysto ama uu argagixiyo, Alle wuxuu leeyahay:

{وَلَا تُلْفُوا بِأَيْدِيكُمْ إِلَى التَّهْكَةِ وَأَحْسِنُوا إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ}

(Hana ku tuurina gacmihiina halaag wanaagna fala,
Alle wuxuu jecel yahay kuwa wanaagga fala)

Nabigeenana - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu leeyahay:

(لَا صَرَرَ وَلَا ضِرَارٌ)

(Dhib ma jiro is dhibna ma jiro)

Ilaalinta nidaamka iyo tixgalintiisa waxay kaalin ka qaadanaysaa in la dhisoo dowlad xoog badan oo sugan, illeen waxaa lagama maarmaan ah bulsho kaste inay lahaato qawaaniin u hagayso dhaqanka dadka, aadanahana u ilaalinayso xuquuqdiisa, korkiisana la saarayo wixii waajib ku ah, waxay dowladaha ku xasilaan oona cadaalad lagu heli karo in la tixgaliyo nidaamka iyo dowladda qaantuunka ku salaysan, in la ilaaliyo qawaaniinta lana raaco waxaa lagu tiriya waxyaalaha ugu muhimsan dhisidda dowladda, qaantuunka wuxuu ilaalo u yahay dhammaan muwaadiniinta, ma suurtogalayso bulshada inay xasillooni hesho haddaan la tixgalinin qawaaniinta, waxaa lagama maarmaan ah qof kaste inuu tunka saarto mas'uuliyaddiisa, sidey u suurtowdo maslaxadda guud oo miraheeda bulshada oo dhan ay guranayso wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee :-

(كُلُّكُمْ رَاعٍ وَكُلُّكُمْ مَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ، إِلَمَامُ رَاعٍ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ، وَالرَّجُلُ رَاعٍ فِي أَهْلِهِ وَهُوَ مَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ، وَالْمَرْأَةُ رَاعِيَةٌ فِي بَيْتِ زَوْجِهَا وَمَسْئُولَةٌ عَنْ رَعِيَّتِهَا، وَالخَادُمُ رَاعٍ فِي مَالِ سَيِّدِهِ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ . . .)

(Dhammaantiina waxaad tiiin ilaaliye, mid kastana waxaa la weyddiinayaa ilaaladiisa, imaamka waa ilaaliye waxaa la weyddiinayaa ilaaladiisa, ninkana waa Ilaaliyaha ehelkiisa waxaana la weyddiinayaa ilaaladiisa, haweeneydana waa ilaalisada guriga ninkeeda waxaana la weydiinayaa ilaaladeeda, adeegahana waa ilaaliyaha hantida sayidkiisa waxaana la weyddiinayaa ilaaladiisa...)

Bulshada mas'uuliyadda leh waa bulsho is haysata, mid kaste wuxuu garanayaa kaalintiisa, wuxuuna tixgalinayaa qofka kale, maxaa inooga baahi badan inaan ixtiraamno nidaamka oona aan qaadano qawaaniinta, iyo dadka xuquuqdooda inaan ilaalino ilaa laga helo cadaalad, bulshada oo dhanna ay hesho amaan iyo nabadgeleyo iyo xasillooni, dalkeenana aan aragno asoo meel ku habboon ka jooga ummadaha dhexdooda.

Waxaa ka mid ah waxyaalaha lagu dhiso dowladaha: dhisidda dhaqaalaha, wuxuu ka mid yahay dhaqaalaha tiirarka ugu muhimsan dowladda oo daruuri ah, dhaqaalaha xoogga leh wuxuu siiyaa dowladaha inay kasoo baxaan waajibaadkooda gudaha iyo dibaddaba, inay dadkooda siiyaan nolol fiican, marka uu dhaqaalaha daciifo waxaa faafaya faqri iyo cudur, noloshana way

qasmaysaa akhlaaqdana way fasahaadeysaa, waxaana badanaya dambiyada, cadowga dowladaha gaadanayana fursad weyn ayuu u helayaa, kuwaasoo ka shaqeynaya riditaanka dowladaha iyo inay galiyan fowdo aan damaanaynin, ummadda aan soo saaranin waxyalaha muhimka u ah oo noqonaya kuwo dulsaaran ummadaha kale ma hanan karaan kalmaddooda iyo xornimada go'aankooda.

Dhaqaalaha xoogga leh ee dowladda wuxuu u suurtgalinaya inay ugu dhix noolaato ummadaha kale si karaamo iyo ciso leh, sidaa awgeed Islaamka xoogga ayuu saaray hantida, maxaayeelay waa lafdhabarta nolosha, nolosha la'aanteeda ma socon karto.

In dowladaha dhaqaale ahaan loo dhiso waxay u baahan tahay sugidda shaqada iyo siyaadinta waxsoosaarka, ma hormari karto ummad ama mu'asaso ama qoys haddysan jirin shaqo iyo sugitaan, ma aha kaliya shaqada in la badiyo ee waa in la sugaa iyadoo la kordhinayo siyaadinta waxsoosaarka, kaasoo dhaqaale soo galinaya dhammaan dadka dowladda u shaqeynaya, wuxuu nagu boorriyay rabbigeena - subxaanahu watacaalaa - shaqada iyo inaan dhulka ku yaacno, wuxuu yiri:

{إِذَا قُضِيَتِ الصَّلَاةُ فَانْتَشِرُوا فِي الْأَرْضِ وَابْتَغُوا مِنْ فَضْلِ اللَّهِ وَادْكُرُوا اللَّهَ كَثِيرًا لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ}

(Markase salaadda la dhammeeyo dhulka ku kala faafa, dalbana (doona) khayrka Alle, Ilaahayna xusa in badan waxaad u dhawdhiin inaad liibaantaan).

Wuxuu kaloo yiri:

{هُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ الْأَرْضَ ذُلُولًا فَامْشُوا فِي مَا كَبَّهَا وَكُلُوا مِنْ رِزْقِهِ وَإِلَيْهِ النُّشُورُ}

(Alle waa kan dhulka ka dhigay mid laylan ee ku socda waddooyinkiisa kana cuna quudkiisa kulankana haggiisa ayuu ahaan).

Wuxuu ku tiriay nabiga inuu yahay waxa ugu fadli badan uu addoonka cuno wixii shaqadiisa iyo daalkiisa uu ku helay, wuxuu yiri:

(مَا أَكَلَ أَحَدٌ طَعَامًا قَطُّ خَيْرًا مِنْ أَنْ يَأْكُلَ مِنْ عَمَلٍ يَدِهِ، وَإِنَّ نَبِيًّا اللَّهُ دَأْوَدَ عَلَيْهِ السَّلَامُ كَانَ يَأْكُلُ مِنْ عَمَلٍ يَدِهِ)

(Qof waligii ma cunin cunto ka khayr badan wixii gacantiisa uu ku shaqaystay, nabi daawuud – nabadgelyo korkiisa ha haatee- wuxuu ka cuni jiray wixii gacantiisa shaqeyso)

Wuxuu kaloo yiri:

(مَنْ أَمْسَى كَالًا مِنْ عَمَلٍ يَدِيهِ أَمْسَى مَغْفُورًا لَهُ)

(Qofkii daalo shaqada gacantiisa awgeed waxaa loo dhaafayaa dambiga)

Iyo in laysugu yeero waxsoosaarka, wuxuu leeyahay rasuulka:

(إِنْ قَامَتِ السَّاعَةُ وَيَدِ أَحَدٍ كُمْ فَسِيلَةٌ، فَإِنْ اسْتَطَاعَ أَنْ لَا يَقُومَ حَتَّى يَعْرِسَهَا
فَلَيَعْرِسْهَا)

(Haddii ay qiyaamo dheceyso midkiinana gacantiisa tallaal uu ku jiro hadduu awoodo inaysan qiyaame dhicin ilaa uu ka tallaalayo ha tallaalo)

Wuxuu leeyahay rasuulka:

(مَا مِنْ مُسْلِمٍ يَعْرِسُ غَرْسًا، أَوْ يَزْرُعُ زَرْعًا، فَيَأْكُلُ مِنْهُ طَيْرٌ أَوْ إِنْسَانٌ أَوْ بَهِيمَةٌ، إِلَّا كَانَ
لَهُ يِهِ صَدَقَةٌ)

(Muslin ma jiro oo tallaalaya tallaal ama beeraya geed oo uu ka cunayo shinbir ama insaan ama xoolo hadday dhacdo sadaqo ayay u noqonaysaa).

Dhulka wuxuu ku camirmaa shaqada iyo waxsoosaarka, dowladahana midaas ayaa lagu dhisaa qofkana wuxuu ku ilaalinaya sharftiisa iyo karaamadiisa.

Waxaa ka mid ah waxyaalaha lagu dhisidha: dhisidda wacyiga xagga saqaafada iyo diinta iyo fikirka iyo aqoonta, marka la waayo ama uu daciifo wacyiga dadka malaga yaabo in la helo dowlad xoog leh, waxaa lagama maarmaan ah inuu sarreeyo dadka wacyigooda, qof kastana uu garto waajibaadkiisa iyo xuquuqdiisa.

Taas waxay soo galaysaa in la dhisidha wacyiga iyo dareenka iyo dhaqanka ummadda iyadoo loosoo marayo tarbiyada akhlaaqda iyo saqaafada waxtarka leh

^
iyo in laga hortago jahliga, sidaa awgeed waxaa laga rabaa dhammaan mu'asasooyinka dowladda inay isgarab qabsadaan sidii loo dhisi lahaa wacyiga saqaafiga iyo diiniga iyo fikriga iyo cilmiga, kaasoo dadka u suurtagalinaya inay ogaadaan intuu la eg yahay waxa kusoo wajahan si ay uga hortagaan, iyo inay ka hortagaan kutirikuteenka oyna baabi'iyaan, gogoshiisana ku dilaan, inaysan raacin beenta iyo kutirikuteenka danta kale laga leeyahay, kuwaasoo isku dayaya inay dhib u geystaan dalkeena, wuxuu leeyahay Alle:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنْ جَاءَكُمْ فَاسِقٌ بِنَبِيٍّ فَتَبَيَّنُوا أَنْ تُصِيبُوهُ قَوْمًا بِجَهَالَةٍ فَتَصْبِحُوا عَلَىٰ مَا فَعَلْتُمْ نَادِمِينَ}

(Kuwa xaqa rumeyow hadduu iduinla yimaaddo faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho la'aan, markaasna aad ka shallaydaan waxaad fasheen)

Sidoo kale waxaa laynaga rabaa inaan buraarugsanaano, oo aan ku cibraqaadano dadka kale, inaan ka faa'ideysano khibradaha nolosha, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا حُذِّرُوكُمْ}

(Kuwa (Xaqa) rumeyow qaata digtoonidiinna)

Wuxuu leeyahay nabigeena:

(لَا يُلْدَغُ الْمُؤْمِنُ مِنْ جُحْرٍ وَاحِدٍ مَرَّتَيْنِ)

(Mu'minka lagama qaniino hal god labo jeer)

Waa inaan ogaanaa in la dhiso dowlad oona la ilaaliyo, waa amaano luqunta nagaga xiran, qof kaste meeshiisa iyo goobtiisa, annagoo adkeynayno dhismaha inuu suurtagalyo marka la layska qabto kuwa wax dumiya wuxuu leeyahay gabyaaga:

مَتَى يَلْبُغُ الْبُيَانُ يَوْمًا تَمَامًا * إِذَا كُنْتَ تَبْنِيهِ وَغَيْرُكَ يَهْدِمُ

goormuu gaarayaa dhismaha dhammaystirkiiisa maalin *
markaad dhiseyso qofka kalena uu duminayo

Wuxuu leeyahay nabigeena:

(أَنْصُرْ أَخَاكَ ظَالِمًا أَوْ مَظْلومًا ، فَقَالَ رَجُلٌ : يَا رَسُولَ اللَّهِ ، أَنْصُرْهُ إِذَا كَانَ مَظْلومًا ،
أَفَرَأَيْتَ إِذَا كَانَ ظَالِمًا كَيْفَ أَنْصُرُهُ ؟ قَالَ : تَحْجُزُهُ ، أَوْ تَمْنَعُهُ ، مِنَ الظُّلْمِ فَإِنَّ ذَلِكَ
نَصْرٌ)

(U gargaar walaalkaaga asoo gardaran iyo asoo laga gardaran yahayba) nin ayaa yiri: rasuulkii Allow waan u gargaarayaa asoo laga gardaran yahay, ka waran sideen ugu gargaaraa asoo gardaran? Wuxuu yiri: (**dulmiga ayaad ka reebaysaa, taasna waa u gargaariddiisa**,)

Qof kaste naga mid ah waxaa laga rabaa intuu awoodo inuu gacanta ka qabto qofka raba inuu dhib u geysto dalka, aabbaha waa inuu ka qabtaa wiilkiisa gacanta, walaalkana waa inuu ka qabtaa walaalkiisa gacanta, saaxiibkana waa inuu ka qabtaa saaxiibkiisa gacanta, waa inaan noqonin dad aan faa'ido lahayn oo aan la soconin waxa jira, wuxuu leeyahay rasuulka:

(لَا تَكُونُوا إِمَّةً، تَقُولُونَ: إِنْ أَحْسَنَ النَّاسُ أَحْسَنَ، وَإِنْ ظَلَمُوا ظَلَمْنَا، وَلَكِنْ وَطَّنُوا أَنْفُسَكُمْ ، إِنْ أَحْسَنَ النَّاسُ أَنْ تُحسِنُوا ، وَإِنْ أَسَاعُوا فَلَا تَظْلِمُوا) ،

(Ha noqonina qofaan shakhsiyad lahayn, waxaad dhahaysaan: haddii dadka ay wanaag sameeyaan wanaag ayaan sameynaynaa, hadday dulmi ku kacaan dulmi ayaan ku kacaynaa, laakin celiya naftiina, hadday wanaag sameeyaan dadka inaad wanaag sameysaan, hadday xumaan sameyaanna dulmi ha samynina).

Wuxuu leeyahay rasuulka:

(مَثَلُ الْقَائِمِ عَلَى حُدُودِ اللَّهِ وَالوَاقِعِ فِيهَا ، كَمَثَلِ قَوْمٍ اسْتَهْمُوا عَلَى سَيِّئَةٍ فَأَصَابَ بَعْضُهُمْ أَعْلَاهَا وَبَعْضُهُمْ أَسْفَلَهَا، فَكَانَ الَّذِينَ فِي أَسْفَلِهَا إِذَا اسْتَقَوْا مِنَ الْمَاءِ مَرُوا عَلَى مَنْ فَوْقَهُمْ، فَقَالُوا: لَوْ أَنَا خَرَقْنَا فِي نَصِيبِنَا حَرْفًا وَلَمْ نُؤْذِنَ مَنْ فَوْقَنَا، فَإِنْ يَتْرُكُوهُمْ وَمَا أَرَادُوا هَلَكُوا جَمِيعًا، وَإِنْ أَخْدُوا عَلَى أَيْدِيهِمْ نَجَوا، وَنَجَوا جَمِيعًا) .

(Tusaalaha kan ku taagan xuduudda Alle iyo kan ku dhacaya waa sida dad doon qorituur u sameytay, qaar korkeeda ayay heleen qaarna hoosteeda, kuwa hoos markay biyo dhaansanayaan waxay marayaan kuwa ka korreeya, waxay dhaheen: haddaan duleelino qeyteena oo aanan dhibin dadka naga korreeya, hadday u daayaan wixii ay rabaan way wada halaagsamayaan, hadday gacmaha ka qabtaanna way wada badbaadayaan)

Kuma filna qofka inuu ahaado mid naftiisa ahaan u wanaagsan, fiqiga marxaladda wuxuu keenayaa inuu ka gudbo wanaagga una gudbo hagaajinta, wuxuu leeyahay Alle :

{لَا خَيْرٌ فِي كَثِيرٍ مِّنْ نَجْوَاهُمْ إِلَّا مِنْ أَمْرٍ بِصَدَقَةٍ أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ إِصْلَاحٍ بَيْنَ النَّاسِ وَمَنْ يَفْعُلْ ذَلِكَ ابْتِغَاءً مَرْضَاتِ اللَّهِ فَسُوفَ تُؤْتَيْهِ أَجْرًا عَظِيمًا}

(Khayr ma leh wax badan oo faqooda ah, oon ahayn mid fara sadaqo ama wanaag ama hagaajin dadka dhexdooda, ruuxii fala saas asoo doonayo raalli ahaanshaha Alle waxaanu siin ajir weyn)

Wuxuu leeyahaya Alle:

{وَمَا كَانَ رَبُّكَ لِيُهْلِكَ الْفَرْيَ بِظُلْمٍ وَأَهْلُهَا مُصْلَحُونَ}

(Allana uma halaago magaalo dulmi iyadoo Helkeedu wax wanaajin)

Hagaajinta waa waddada anbiyada iyo rususha, midaas ayay ku suurtagalaysaa dhisidda dowladaha, iyo in la ilaaliyo midnimadooda iyo awooddooda iyo ishaysigooda iyo isku xirniintooda, sidey dadka ugu noolaadaan nabadgelyo iyo saafinimo, dood iyo khilaaf la'aan iyo dhib iyo argagixis la'aan, iyo dil iyo dumis ku fasahaadin la'aan dhulka lagu sameynayo.

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay
ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaan in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaan in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Waxaa ka mid ah waxyaalaha lagu dhiso dowladaha laguna ilaaliyo: dhismaha bulshada, Islaamka wuxuu ku dadaalay xiriirka ka dhexxeeya bulshada inuu ahaado mid xoog leh, inuu ka dhexxeeyo iskaashi iyo isu naxariisasho dadka hal bulsho ka dhexeyso, inaan dhib loo geysanin dadka kale, iyadoo lagasoo anbabaxayo oraahda rasuulka:

(لَا يُؤْمِنُ أَحَدُكُمْ حَتَّىٰ يُحِبَّ لِأَخِيهِ مَا يُحِبُّ لِنَفْسِهِ)

(Midkiina ma rummeeyo ilaa uu walaalkiisa ula jeclaado wuxuu naftiisa la jecel yahay)

Wuxuu leeyahay rasuulka:

(وَاللَّهُ لَا يُؤْمِنُ، وَاللَّهُ لَا يُؤْمِنُ، وَاللَّهُ لَا يُؤْمِنُ ، قَيْلَ: وَمَنْ يَا رَسُولَ اللَّهِ؟ قَالَ: الَّذِي لَا يَأْمُنُ جَارُهُ بَوَائِقَهُ).

**(Wallaahi ma rummaynayo, wallaahi ma rummaynayo
wallaahi ma rummaynayo, waxaa lagu yiri: waa kuma**

rasuulkii Allow?, wuxuu yiri: midka deriskiisa aan ka nabadgelin shartiisa).

Wuxuu yiri rasuulka:

(مَا آمَنَ يِي مَنْ بَاتَ شَبَّعَانَ وَجَارُهُ جَائِحٌ إِلَى جَيْهِ وَهُوَ يَعْلَمُ بِهِ)

(Ima rummaynin qofkii bariyo asoo dersikiisa dhiniciisa ku gaajaysan yahay asoo og).

Waxaa ka mid ah muuqaallada dhismaha bulshada: in qoyska ishaysto, kasoo qoyska u ilaalinaya jiritaankiisa, qoyska waa dhagaxa ugu horreeya oo bulshada lagu dhiso, qoyska waa mid masuul ka ah ubadka iyo barbaarinta caqligooda iyo jirkooda, harka qoyska ayaa laga helayaa jacaylka iyo naxariista iyo isu kaalmeynta qoyska is haysta ayay akhlaaqda fiican ku kortaa, dabeeecooinka wanaagsanna ka dhashaan, jacayl ayaa laga helayaa, laakin arrinta intaas kuma eka qoyska waxaa laga rabaa inay masuul ka ahaadaan carruurtooda, wuxuu leeyahay nabigeena:

(كَفَىٰ بِالْمَرْءِ إِثْمًا أَنْ يُضَيِّعَ مَنْ يَعْوُلُ)

(Qofka waxaa ku filan inuu dayaco cidda uu biilayo)

Maxaa ka weyn daayacnimo inaad uga tagto carruurtaada inay baylax u noqdaan fikradaha lunsan ama kooxaha baadiyasan adoon u qumin waajibka kaa saaran inaad ka wacyigaliso khatarta nasoo foodsaaran, sidoo kale waxaan xusuusinaynaa mar kaste

waajibkooda ka saaran waddankooda, jecaylka waddanka waa la dhaxlayaa: wuxuu leeyahay Showqi:

نَقْوَمُ عَلَى الْحَمَاهِيَةِ مَا حَيَّنَا * وَنَعْهَدُ بِالْتَّمَامِ إِلَى بَنِينَا
وَفِيكَ نَمُوتُ كَمَا حَيَّنَا * وَيَبْقَى وَجْهُكَ الْمَفْدِي حَيًّا

**Waxaan u taagan nahay ilaalo intaan nool nahay * waxaan
kula ballamaynaa dhammaystir ilmaheena
adaan kugu dhimanaynaa Masrey saan u noolaanay ***
wejigaaga la furtayna wuxuu ahaanayaa mid nool

Waxyaalaha dowladda lagu dhsio waxaa ka mid ah: in kor loo qaado qiimaha akhlaaqda iyo dhaqanka, ummadaha iyo xadaarooyinka aan lagu dhisin qiime iyo akhlaaq waa ummado tabar yar, iyo xadaarooyin aad u tabar yar, bal waxay ku wataan asaaskooda wixii ridi lahaa, akhlaaqda ayuu ku gaaraa muslinka darajada iimaanka, miisaakiisana uu ku cuslaanayo, wuxuu leeyahay rasuulka:

(مَا مِنْ شَيْءٍ أُنْقَلُ فِي مِيزَانِ الْعِدْلِ الْمُؤْمِنِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ مِنْ حُسْنِ الْخُلُقِ، وَإِنَّ اللَّهَ
يُبَغِضُ الْفَاحِشَ الْبَذِيْعَ)،

(Wax ma jiro ka culeys badan miisaanka addoonka mu'minka maalinta qiyaame dabeeecadda fiican, Ilaahay wuxuu neceb yahay midka xun oo afxumada badan).

Marka la weyddiiyay rasuulka waxa ugu badan oo dadka jannada galiya? wuxuu yiri:

(تَقْوَى اللَّهُ، وَحُسْنُ الْخُلُقِ)

(Alle ka cabsiga iyo dabeeecadda fiican)

Wuxuu ku tiriay rasuulka akhlaaqda inay tahay miisaanka siyaadada iimaanka ama nusqaankiisa, wuxuu yiri rasuulka:

(أَكْمَلُ الْمُؤْمِنِينَ إِيمَانًا أَحْسَنُهُمْ خُلُقًا ...)

(Mu'miniinta waxaa ugu iimaan dhammeystiran kuwa ugu dabeeecadda fiican)

Akhlaaqda qofka waxay ka ilaalisaa xumaanta, iyo kalmadda xun ee wax dumisa, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{وَمَثَلُ كَلِمَةٍ حَبِيبَةٍ كَشَجَرَةٍ حَبِيبَةٍ اجْتَثَتْ مِنْ فَوْقِ الْأَرْضِ مَا لَهَا مِنْ قَرَارٍ}

(Kalimada (Erayga) xunna waxay la mid tahay geed xun lagana rujiyay dhulka korkiisa oon sugnaan lahayn).

Ilaahay cazza wajalla ayaan weyddiisaneynaa inuu nagu hanuuniyo akhlaaqda tan ugu fiican iyo hadalka wanaagsan, iyo inuu joogto nooga dhigo nimcada amaanka iyo nabadgalyada iyo xasilloonida, iyo inuu ka ilaaliyo Masar iyo dadkeeda iyo dhamaan caalamka wax kastoo xun